



Guddiga lug ku Lahaanshaha Waalidka

Taageerida kaalinta ka geysashada waalidka ee waxabarashada ubadkooda

Waa maxay Guddiga lug ku Lahaanshaha Waalidka (PIC) oo maxay qabataa?

Dhamaan guddiyada iskuulada Ontario waxaa looga baahan yahay in ay la'haadaan Guddiga lug ku Lahaanshaha Waalidka (PIC). PIC waa urur la talin oo muhiim u ah guddiga iskuulka. Waxay taageeraan horumarka iyo bad-qabka ardayda iyaga oo waalidiinta kaalin weyn ay ka ciyaaraan waxbarashada caruurtooda. Tani waxay ay sameeyaan iyaga oo:

- fidiya macluumaad iyo talo oo siya guddida degmo dugisyeedka ee kaalinta waalidka iyo qaabab ay waalidiinta ula xiriiraan
- dejiyaan qaabab ay guddiga isticmaalin karaan oo aad uga caawiso taageerida waalidiinta ee waxbarashada ubadkooda inta ay guriga iyo iskuulkaba jooqtaan
- wadaagida macluumaadka iyo teegeerida howsha guddiga iskuulka.

PIC kasta ayaa go'aamiya sida ugu wanaagsan ee lagu gaari karo himilooyinka, iyada oo ay ku xiran tahay baahida gaarka ah ee ay qabaan guddiga iyo jaaliyada, ururkooda iyo xibnahooda.

Sidee buu PIC uga duwan yahay guddiga iskuulka?

Guddiga iskuulka wuxuu ahmiyadda saaraa iskuul shaqsi; PIC wuxuu talo siiyaa heerka guddiga. PIC wuxuu si firfircoon ah u taageeraa guddiyada iskuulka ee guddiga ku jira iyaga oo ku taageera doorkooda ah dhowrista kalinta waalidka ay ka qaataan waxbarashada ubadkooda iyo macluumaad wadaagidda.

Kuma ayaa ka mid noqon kara Guddiga lug ku lahaanshaha Waalidka?

PIC waxaa hoggaamiya waalidiinta oo xubnahoodana waa waalidiinta. Agaasimaha Waxbarashada ee guddiga iskuulka iyo ammaan hayaha ayaa sidoo kale xubin ka ah, sidaas darteed waalidiinta guddiga iskuulka xiriir toos ah ayay la leeyihiin. PIC wuxuu magacaabaa ilaa iyo seddex xubno jaaliyadda ka mid ah. PIC ayaa go'aamiya haddii lagu darayo xubno kale, sida maamule, macalimiin iyo shaqaalaha taageera si ay u buuxiyaan baahida maxaliga. Xubnaha waalidka waxay ku jirayaan teeram ha lama laba sanadood ah. Xub kasta oo waalidka ka mid ah waa inuu ahaadaa waalidka ama mas'uulka arday dhigta iskuul qeyb ka ah guddiga oo ay PIC dhidibada u taagtey.

Miyaan ka soo qeyb gali karaa kulamada?

Haa. Qof kasta waa lagu soo dhoweeyaa inuu soo xaadiro kulamada PIC oo wax badan ka oggaado sida PIC u shaqeyso. Kulamada waxaa la qabtaa ugu yaraan sanadkiiba afar jeer. Ka eeg bogga internetka ee guddiga si aad uga oggaato goorta iyo halka kulamada ay ka dhacayaan, iyo sidoo kale daqiiqadihii kulamadii hore.

Ma sharciga waxbarashada ayaa shaqada PIC hagaya?

Haa. Sida dhamaan iskaashiga waxbarashada, PIC waxay ciyaartaa door ama kaalin muhiim u ah haqab-tirka aragtida iyo himilooyinka Ontario ee sharciga gacan ka geysashada waalidka ee lagu taageerayo horumarka iyo fayyo-qavja ardayga. Sidoo kale PIC waxaa ilaaliya Xeerka Ontario ee 612/00.

Sidee bay PIC gacan uga geysataa Waxbarashada Ontario?

Goorta ay waalidiinta iyo iskuulada ay wada-shaqeeyaan, waxaa ka dhasha natiijooyin bada oo wanaagsan. Kuwani waxaa ka mid ah hormarka ardayda oo wanaagsanaada, maqnaanshaha oo yaraada, aqlaaqda oo wanaagsanaanta iyo waalidiinta oo korodha kalsoonidooda ku aaddan waxbarashada ubadkooda. Wasaaradda Tacliinta, guddida degmo dugisyeedka iyo iskuulada oo dhan ayaa ka wada faa'ideysta howsha muhiimka ah ee ay waalidiinta qabtaan oo ay ku taageeraan waxbarashada ubadkooda. Sidoo kale waxay kaloo ka faa'ideystaan in ay maqlaan fekradaha waalidka iyo go'aannada maxaliga, degmo iyo gobolba.

Halkee ayaan wax badan ka oggaan karaa?

Booqo: ontario.ca/EDUParents baro wax badan oo ku saabsan:

- Guddiga lug ku Lahaanshaha Waalidka iyo gacan ka geysashada waalidka ee iskuulada Ontario iyo guddiyada iskuulka
- Iskaashiga Waalidiinta: Sharciga Gacan ka Gaysashada Waalidka ee Iskuulada Ontario
- Xeerka Ontario ee 612/00: Guddiga iskuulka iyo Guddiga lug ku lahaanshaha Waalidka

